

Waaxda caabaqyada

23.4.2024

## Caabaqyada A- streptokokki

A- streptokokki wuxuu ku keenaa dhuunta- iyo maqaarka caabaqyo u soo muuqan kara inay ku faafaan qoyska dhediisa, xanaanooyinka iyo iskuulada. A- streptokokki wuxuu keeni karaa caabaqa dhuunta (“angiina”), qandho guduud, nabaro qolof leh ama maqaarka dabada agagaarkeed ( dabada maqaarka ku wareegsan oo caabaqa oo ah “ angiinada dabada”).

Qandho guduudka calaamadiisu waxay noqon karaan sidoo kale dhuun xanuun, xummad, madax xanuun, carabka o casaan/ guduud xoog ah noqda iyo cuncun maqaarka ah. Caabaqa dhuunta calaamadiisu waxay noqon karaan sida dhuun xanuun, xuub cad oo cunaha saarma iyo xummad. Calaamadaha nabraha qolofta leh waa kuwo si dhakhso ah u faafa, dheecaan leh iyo finan ay kor saaran yihii caad jaale/ huruud ahi, oo sida caadiga ah ku wareegsan afka iyo sanka. Dabada maqaarkeeda calaamadaheedu waxay yeeshaan finan guduudan oo cuncunaya oo dabada agagaarkeeda ku wareegsan.

### Faafitaanka

A- streptokokki wuxuu ku faafayaa wasakhda jidhka ka soo baxda iyadoo la isugu gudbinayo dhibcaha- iyo taabasho ku faafida si dhow iskula xidhiidhka. A- streptokokki faafitaankiisa waxaa lagaga hor tagi karaa nadaadada gacmaca oo wanaagsan. A- streptokokki caabaqa dhuunta ee uu keeno iyo qandho guduudku waxay ku faafaan wiig gudahood inta aanan calaamduhu bilaabmin. Nabraha dheecaanka leh waxaa la is qaadsiinkaraa, marka ay calaamaduhu bilaabmaan. A- streptokokki calaamadaha caabuqiisu waxay bilaabmaan 1- 4 maalmood marka ay ka soo wareegto. Iaakiin mudadda uu ku soo baxayaa waxay noqon kartaa bil.

Haddii laga shikisan yahay wax ka mid ah A- streptokokigu caabaqa uu keenayo, kaalay oo la soo xidhiidh daryeelka caafimaadka.

### Daaweynta

A- streptokokiga caabaqiisa waxaa lagu daaweyaa mar walba qalajiye/ antibiyootik. Nabraha dheecaanka leh waxaa lagu daweyaa marba sida ay xaaladoodu tahay ama dawooyinka la mariyo ama afka dawooyinka laga qaato ee qalajiyayaasha ah.

Caabaqa dhuunta ku dhaca iyo qandho guduudka

- burushka cadeyga iyo- dawada cadeyga waa la badalayaa 48 saacadood marka ay ka soo wareegto ku bilaabidda dawada qalajiyaha ah
- shukumaanka/ tuwaalka gacmaha lagu qalajisto waa in maalin walba la badalo.
- kataabada ilmuuhu nuugaan iyo caagaga lagu keydiyo maalin walba waa la karinayaan
- ilkaha la iska siibo, kuwa ilkaha lagu xidho iwm maalin walba waa la maydhayaa
- carruurtu alaabeyda ay la seexdaan waa la meydhayaa 48 saacadood marka ay ka soo wareegto ku bilaabidda qalajiyaha

Waaxda caabaqyada

23.4.2024

### Nabraha dheecaanka leh iyo maqaarka dabada

- shukumaanada iyo dharka hoosta laga gashado waa in maalin walba la badalo.
- maqaarka meelaha caabaqay taabashadooda waa in la iska ilaaliyo
- gogosha sariiraha ee lagu seexdo waa la badalayaa 48 saacadood marka ay ka soo wareegto ku bilaabidda dawada qalajiyaha ah
- carruurtu alaabeyda ay la seexdaan waa la meydhayaa 48 saacadood marka ay ka soo wareegto ku bilaabidda qalajiyaha

Nadaafad ahaan waxaa kuugu filan nadaafada todobaadka la sameeyo ee caadiga ah (qolalka huufareyntooda iyo meelaha korkooda oo la masaxo iyo sidoo kale musqlaha albaabadoo gacanta laga furo iyo qasabadaha biyaha oo si taxadir leh loo tirtiro).

Haddii ilmahaaga lagu sheego caabaqyadaa horey lagu soo sheegay mid ka mid ah, taas waxaad wargelineysaa goobta xanaanada ilmaha ama iskuulka. Goobta xanaanada ilmaha ama iskuulka waxaa lagu noqon karaa, marka ay ka soo wareegto 24 saacadood markii qalajiyaha lagu bilaabay. Nabraha dheecaanka leh dhinacooga goobtada xanaanada ama iskuulka waxaa lagu noqon karaa, marka ay 24 saacadood ka soo wareegto daawada la marinayo.

Hagitaan dheeraad ah THL:ka bogooda <https://thl.fi/fi/web/infektiotaudit-irokotukset/taudit-ja-torjunta/taudit-ja-taudinaiheuttajat-a-o/kihomato>

Fiiri sidoo kale Terveyskirjastoda, caabaqyada iyo xanaanooyinka  
<https://www.terveyskirjasto.fi/dlk01200>